32. DUMAR II

Sh. Abow/ … … taataabadee yacnii saddex waaye laakiin saddexdaas tiiyo u faylantee tii horta soo sheegnay may dhahaayeenaa in naagooga in dhaqane “afaaf iri, araasi qayliso, ingeelaa sooriyee iddo dheedheertoo qabadaase, afaaf iri waxaa liki jeede; tii naagtii ragga beeraha soo bahi, beledkay joogtaa, waa wareegaysaa, waa ka maqantahay guruga, afaafkeeda orax lee waaye, waa xiranyahay guruga; afaaf iri, waa ka maqantahay. Taas caydeeda waa saasaa u keenaysaa.

Tii kale, ‘araasi qayliso’ markii dharaartii la gaaro qayladeeda yeeraysa deriska maku hergelaaw, waa qaylinaysaa ama caruurtaa caynaysaa misa raggii oo ku qaylinaysa, ama deriskay caaynaysaa. Waxaa la arree ‘araasi qayliso’. Naagaha kuwaas yacni waa kuwii caaynaayi, yacni qiima muku jiraan kuwaas. Tan kale waa ciji dheedheer, ciji dheedheer waxaa weeye, markii raga boho markaasaa hogodaase qabadaasi meelba iska hogaase, tintaa hogaase, is hogaase is hogaasa, wal ii qabato ii wal kale ma kasaasa, shaqo ay ku toosto ma taqaano, waa is xoqaysaa beriga oo dhan. Markaasaa waqtigoo waqti daran haddii la gaaro markaasaa adiga debka shidaasa, markaas iidoo tinteeda suubsaneen, maradeeda si xun si xun eh, yacni naagahaas saasaa lagu caaynaa. Laakiin naagaha caydooda hor ma u galayee, naagaha waa la qiimeynaa, qiimadooda ma dhowa, naagaha haddii la qiimaynaa la yiraahdo; adduunkan, ninka haddii hormaray waxay ku hor maray ma ku hormaray naagahay ku hormaray. Anigoo hortayda la soo sheegay, Aw Daahir Afqarshe ii soo sheegeen, yacni anina hadda ka sheegow dhinaca beeraleyda, naagaha yaa ku hor maray. Naagta may in ku hormarnay, may dhahee horta may lusku waaniyee guurkaa hori guurka dambi yaa inbaa leye.

Waxaa weeye naagta, may liki fadee wixii regga in dhibaayne oo dhib insheenaaye inaa naagta ka dhagto suubiso. Haddii naagta taas laga waayo qiima ma leh, naag ma aha taas, naagtaas yacni liki naafsidee, naag yacni liski sheegee dadka dhanaa wal in sheenaase qaraawadeed dhannaa wal in sheehaase, liki naaf sidee. Naagta tolka liki guursadi iyo regga qabo may li fadee naagta in ahaato dhisinka in aa ahaato, dhisinka iyo saacada may i dhahooyee xirigga, naagta xirigga ahaatoo la fadee, dhisinka oo geedka surunaa lagu jeedaa oo lo’da lagu xeraayo, oo xoolaha lagu xeraayo, sacdana waa sacala lo’da waaye, maxaa i dhaxeeya xeregga lagu xeraay, marka naagta inay ahaato la faddee sacaada iyo dhisinka dhexdiyoo inay ku jirto, yacni lamada qoos haku dhaxayso, yacni xeregga, waa tii oo Axmed Nuur dhahaayay so’aashuu uu Aw Daahir weydiinaayay hoggaanka midda uu dhahaayay. Lamada qoos inay u dhaxeeya naagta saas inay ahaatoo la fadee lamada qoos, hogaanka u dhexeeya labada qolo inay u dhaxaysaa la fadee naagta.

Marka naagta haddana may liki fadee yacni in martida haddii un kooyto in qaddo, naagihii hore in qadi jireen, iidoo hunguri biseel ah, diyaar eh, yaa marti kooyaasa hadday marti kooyto, raggii may dhahee: “hunguri soo sii martidan”, naagtii caloosheeda inay xirataa la rabaa, martidii hungurigaas oo diyaar ah siiso, naagihii hore saasey yeeli jireen, caloosheeda xereheysi hungurigaas martidaa la siinaa, waa la sooraa, waana kor dhac. Regga bariis waxaa ceeb ku leh, raggii iyo naagtii waa isla qattan yihiin haddii usuga uu la fadhiisan martida. Markii martida oo baxdo “war Himay! Wax ma ii reebtay?” “Ee martidii soo ii tiri wax ma reebin” “Martiley kooytaa ma kooynee tomon iyo

lamaday qarsanley fadee”. Raggana taasaa ceebtiisa ah, marka naagihii yacni qiimishoo in la qiimeeyo wal faaladiyoo la daaro karo ma aha.

Hooyo wax lagu malalo ma leh. Matalan naag awkan canug baaba ka jiridi, hameenka dhan ooyee, cunuggii sida in haaytoo la fadee, hamiinkii dhan iyee la dhafraasa, hooyadaa la dhafaraasa, maay letaa cunigii, reggii waa iska jiifaa, “hurday, hurdooy kaali, hurdadii ku hayso anina waa i haysaa”, saasaa cawadii dhan saasay ku heesaysaa illaa wiilkii saas u hayso ama gabadhii saas u hayso. Odaygiina waa iska jiifaa, odaygu waa kala yahay mid waa la soo jeedaa oo waa la murugoodaa, midna waa iska jiifaa, laakiin ii ku dhafraysa, naagtaa la yiri: “iri ku dhoorto uun ku dhoorto” naagihii hora saasay ahaan jireen iri iyo uun ilmaha iidaa ka dhooraysay. Naahaga saddex daba in adkaysadaayaan oo ragga u adkaysan karin, saddaxdii dab: ilmaha nuujiskooda dhibaatadii loola maraayo iyo …… naagaha u adkaysadaayan, dabkii wax lagu karinaayey naagaha in adkaysadaayan, kii saddexaad; ragga waa iska taqaaniin ee maamulkiisa hoose naagta waa u adkaysanaysaa saddexdaas deba naagaha u adkaysanaysaa, saddexdaas deba naagah u adkaysanayaan, tii nacasta aan ahayn, iidaa iska leh. Marka naagaha yacni haddii hooyo la faalinaa la yiraahdo, dhinacaan beeraha aan ka sheekeeyo oo aan ka sheekeeyo yacnii hoosha ay qabtaan, iidoo sidaas eh, mar dhoweed ee hadda waxaa idiin soo bilaabay in beerta lagto oo ka soo noqotaan bes keliya iyo ashuunka biyaha ay ka keento yaan joognaa. Maxay qabanaysaa haddii la soo noqdo? Waxay qabanaysaa; subixii xaaqid baa galaysaa oo dhulkayba xaaqaysaa oo gurigay nadiifinaysaa, haddii jimco ka jimco la gaaro asal baa, haddii guriga soo cad cadaado, asal baa marinaysaa. Falqis …… markii waxaa la keenaa wax la yiraahdo buk buko oo waa wax wabiga agtiisa ka baxo kaas baa ood oo kale loo sameyn jiray, kaas baa ilmaha loo samayn jiray, gogoshaasaa la samayn jiray, gogoshana iidaa samayn jirtay, maqaarka xoolaha laga siibo waa la megdaa la sameyn jiray tanna iigaa samyn jireen. Marka naagaha ragga haddii meel bulsho fadhiyo oo raggeeda u yeero waxaan ku arki jirnay, naagtii qiimaysan sharaf leh: “ar hebeleey!” haddii la yiraahdo, intay bud soo tiraahdo iyadoo leh “aboow”. Aniga naftirkayga waa la isoo dhihi jiray. Aniga iska dhaaf haddii aan soo qabsado hal qabsi ahaan, waa caan naagtayda Muumow Abbow Abbow aa loo bixiyay meel aan gaarsiiyay halqabsi ahaan haddaan soo qabsado. Naagtii raaliya ah yacni waxaa la dhahay bulshi kasto haddii lagu jiro, loo yeero “abow” inaa dhihi jirtay. Regga haddii iida guriga joogto usuga heeraha ku maqan yahay, haddii beeraha ka yimaado, inaa intii usuga ka yimaado inay waardiyo ku hayso, soo dhaweyso markii yimaado iyadoo guriga hortiisa nadiif ka dhigto ay xaagto ay bilbaabisho, oo yacnii uunsiga ku shiddo, yay guriga ku soo dhaweynaysay, oo usuga beeraha ka yimaado, raggeeda yaambada ka qabanaysay, maradaa ka bedelaysay oo maro kalaa siinaysay, markaasa qoboysi biyo u dhuminaysay. Tii beeraha u bixinoo ilmooley oo guriga joogto mise kale oo guriga joogto isaga reebo iska joogto, taas waa gaar. mid beeraha u raacayso iidaley guriga suubinaysa, mid u baahnayn inay beeraha u raacdo, mid oo ilmooley ah oo guriga u joogto, inta kale naagaha maba yeelayaan inay guruga joogaan oo waa is raacayaan. Naagaha yacnii qiimo ayeey leeyihiin. Naagaa jirta inay gurigana ogtahay, beerahana ogtahay, xoolihiina iyada lisayso, naagaha baadiye oo ah beeraaleyda yacni.

Marka bal naagaha xamaryaha joogaanmarkay gabdhaha is diriraan gabdhaha intii is haleen lahaayeen, is qaqaniini lahaayeen waa u yeeri jireen, waa loo yeeri jeray, waa loo yeeraa, waxaa la dhahaa naag fulaan, naagtaas

baa joogtaa u taga, yacni maxaad ku diriraysiin, gabdhaa tihiin, naagaha duq eh oo hooyada ah baa loo yeerayaa, waxaad dhahaysaa: “kaalaya bal kaalaya, gabdhayaalo baad tihiin ha is dirinina war is walaasada kow dheh, sidii oo gabdhaha la arki jiray isu yeela qo walba ha dhigato anaa ilaalinaaya, meeshaa ku kala hereysiin, anigaa ilaalinaayee qof walba sidii edebteeda ah, aniga ilaalinaaya qof walba ha soo dhigato anigaa fiirinaaya meeshaa ku kala hereysaan, idinkoon is farsaarin, idinkoo is diririn. Gabdhihii waa la xujeynayaa, waa is caayeen oo waana is rifrifeen, caaydii is rifrifaaheed wax lisu sheegay, marka caydii iyo farsaarkii ma-ha tan u danibaysaa la fiirinaya markaasay oranaysaa oo waa u carrab dhabaysaa oo waxay dhahaysaa uluulu! Uuluuluu! Ulu ulu! Iliili ili ili iliili ! waa carrab dhaweysaa markaasay dhahaysaa tan baa saas eh oo tan ma gaari kartaa, tan waa kugu simantahay, adiga gabartayda caydaada bilaash waaye oo waa dhmantahay, weli waa u qarinaysaa “gember la kac baa tahay”. Gudowga gambar la kac, markii lagu gudaayay” si walba wax ugu sheegaysaa, ti walba faalla ka bixinaysaa. Habaryaasha saasey, kala ahaayeen. Marki gabdhihii ii koo mid madluun eh, midna faraxsaneh ayaa meeshii ka soo dureerayaan. Si oo ciriiri eh dirirkoodaba cariiri, calaashaan waa cabsanaayaan oo ma is diriraayaan, si isku diriraan waa cariiri maahee wax baa loo soo sheegay, haddii is diriiraan habar baa u yeeraysa oo faallaa laga bixinayaa. Marka saas bay gabdhaha hooyoyaalka u dhaqaalaynaayeen oo heerkaas ay gaareen, dirirta xataa saas bey u dhaqaaleyn jireen, saas bay yeeli jireen naagihii hore. Marka hooyo waan aragnay, waa fara badan tahay, meel kasta caan bay ku noqoti. Haddii beled iyo baadiye meel kasta, yacni hooyo lama gaari karo faaladeeda. Laakiin waqtigan dambe waxaa la arki kistoo waxyaalo kale fudfudeyd, waa iska jiraan, markii horena waa jiri jireen tii laga arko xumaato, laakiin waxaa u badnayd hooyo fiicnaanteedaa badnaan jirtay, calaashaan waa hor tagi jiray, gabdhaha oo caasiga eh, gabdhaha xun xun lagu arko waa lagu hortagi jiray, gabdhaha oo caasiga eh gabdhaha xun xun lagu arko waa laga hortagi jiray oo waa la cayn jiray. Hadda wax la caynaayo ma arkaysid, yacnii dadkii oo dhan waa is dhax maraan, waqtiga semenkaanaa la joogaa. Laakiin naagaha, yacni hooyo matal ma leh, shaqada ii ka qabtaan waa fara badan yihiin, yacnii ilmaha la dhalo markii dharkiis la dhaqdhaqo dharka habeenkii baa yacnii kaadi iyo xaar ku daadanaa, haddii la dhaqdhaqo saas korkiisa lama saaraayo, waa la aruurinayaa markii enjego saab la yiraahdo saab daladuul baa la is kor saarayaa, baa la saari jiray, saabkaas baa la saarayaa saabkii dalanduulka hoostii idin baa la dhigaa, waxaa lagu shidaa quddi geed la yiraahdo, quddigaasaa hoos loo dhigaa aa lagu shidaa oo lagu uuminaayi, markaasaa ilmaha dharkooda saas baa la yeeli jiray. Ashuunkaa kuu soo herey, dhuxushaan ma aragtay tugaarka oo aad u gaduuuufeen dhuxushiis aa lo soo qaadayaa, yacni qoriga inta waa deb dhuxul intana waa qori ashuunka biyo ku jiraan bug lagu siinaa lagu deminaa, waa isgoow uu noqonaa. Debka huraaya oo dhuxushiisa halahaan debka eh halahaanna qori ka eh baa lagu ridayaa. Sida wax u jiraan aa u sheegaa oo caam eh oo jira oo jiri jiray oo dhaqankaa ahayd. Marka caraftii marka baadiyihii baa caraf loo yeelayaa. “Bef!” aa lagu siinaa. Marka oo la leeyahay ma la illoobo ... guriga adooga oo biyha loo soo tiimbiya “war hooy, war heblaay maxaa waaye biyahaan caraf ma laha ee beriga see waaye wax malagu ridinoo? Qori laguma soo darin? Adoogaa dhahaaya, qorigii noogu soo rida oo. Waa lagu dhaafaa markaas qorigii isagoo debkiisa baxaaya lagu ridaa, markaas udgoonuu noqonaa biyihii dhan waa carfaa. Marka biyaha laba shaambaay

baa lagu shubaa ama laba ashuun. Shaambayadoo waa la dhigayaa oo dhigaal eh oo eh sidii subaxdii biyo la arooray, biyaha kalena shaamiyaal kalaa lagu shubaa, musqusha shaaambiyaal kalaa la dhigaa, dhinaca kale shaambiyaal kalaa la dhigaa oo istacmaalka, mid hunguri lagu kariyo, mid oo qabays ah iyo mid qaboobban oo cabow loogu tala galay. Naagtii yacnii qiimaheed oo ah naag naagtii u horeyso kusi ma darsana, tii kalena waxeeda oo dhan waa isku dar darsan yihiin waxa kulli. Marka naagihii saas baa kala ahaayeen. Anigana maantalee koow ii eh waxaan jeclahay in dib u soo noqoonno mar kale si kedis, maantalee ii koow ah barnaamijkaan odayaasha waad mahadsantihii, J/lle Axmed Nuur waad mahadsantahay intii oday meesha isla joogtaan, aniga maanta halkan in aan ku joojiyo rabaa, inkastoo yacnii maay maayda aan ka sheegay, wixii la fahmin oo su'aal ah oo la keeno anaa fasiraaya "A-Salaamu calaykum wa raxmatu Laahi wa barakaatuhu".

A. Nuur/ Marka hore Sheekh Abow aad iyo aad ayaad u mahadsantahay koow. Bal maka u horeeya aniga iyo adigu laba meel baynu kala qaabil sanayn, adigu beerahaad qaabilsanayd, aniguna badda iyo guryaha xeebleyda ah ayaa la iiga doonayaa in aan ka hadlo, waloow aan warka qaybinaayo oo aan qaybiye ahay oo warkaba ii furnayn, haa! Haseyeeshee marka aniga waxaygii badi adigaaba sheegay afkeennaa kala geddisan ma aha ee labadaynu aad baan isugu dhow dhownahay, marka magacyadeenu waa isu dhow dhow yihiin. Dhaqanku xoogaa laba guri oo la degan yahay weeye, waa dad deggan, dhibaatada aad la kulantaaniin oo guriga la deggan yahay ka imanaysa ayaynu wadaagnaa, marka aniga oo dib u dhiganaaya, waxaan ku noqonaayaa Xaaji Maxamed Liibaan baa weli wax iiga xiran yihiin. Waxaa weeye (Cali Mudiir waan ku soo noqonayaa, waa kugu xiri doonaa, isagaa warka bilaabay oo waa ku xiei doonaa) waxaa weeyedhoor maahmaahood oo nagu adag ku saabsan mowduucan, waa koow. Waxaa weeye horta, Xaaji Maxamed Liibaan is diyaari, Xaaji Maxamed, waa ila socotaa bay ila tahay koow.

Waxaan rabaa "Saaddo" erayga la yiraahdo "Sacabsato, Daaddo, Naag, Afo, Islaan, Habar, Dangalo", intaasaa wax eray la xiriira oo magacyadooda yaab leh degdegsiino bey u badan yihiin, warka waxaa la rabaa inuu hadalladaas ka dhex dhaso ayaa loo baahan yahay. Waan garanay, waxaan maqalla Saaddo, Salaan Carrabey gabaygiisa baan moodaayay inuu yiri: "Saaddo la i mood, silicay maxaan kaga samraa, saaddo la i mood", mid buu ku lahaa, marka eraygaas saaddada ahi af Soomaaligu waa ku jiraa, bal macnaha uu leeyahay. Sacabsato waynu garanay oo weynu naqaan oo waa naagta ... ... , Daaddo oo banaadir bey caan ku tahay, naag waan garanay, Afo waan garanay, Islaan waan garanay, oo Habar waan garanay, Dangalo waan garanay, waxaan kaloo rabnaa inaad wax inooga sheegtaan Bilcaan, Ayeeyo, murnahooda dib baan u dhiganayaa, magacyadaa badan oo waa wax yaab leh: waxaan kaloo rabnaa in dhowr maahmaahood oo ku saabsan oo naagaha lagu liindaayo in halkan idiinka sii weydiiyo bal saddex kale "suun gardaageed naagood dhexduu ka kala go'aa", maxay ula danlahaayeen? Suun gardageed maxaa loogu maahmaahaa? Maxay ula danlahaayeen oo fasuraad baan u baanahay, "talo naagood ma lagu tanaado", iayana wey dhaheen, waxay kaloo dhahaan: "ninka iyo naagtiis colna ma aha nabadna ma aha", ayeey dhaheen, oo waxay kaloo dhaheen " naagi waa hoob oo wax ma gartaan, oo geela maba inooka soo wardoonaan". Geel baa ka dhumay markaas bey nabadooda ka doonaan

waxay kaloo dhahaan: “indheer garato naagi kuma jorto, ragna waa ku dhif“. Waxay kaloo dhahaan: “kal caana galeen kas ma gelin“. Marka intaa maahmaahood Xaaji Maxmed Liibaanow, waan kuu soo wareejinayaaye bal waxaad ka oran lahayd adiga lee waaye, ragga kaleeto waan ku noqon doonaaye.

Xaaji M. L./ Axmed Nuurow hadalada sida aad u tiri, rijin keliya oo Soomaaliya ma aha, rijinba si uu yaqaannaa, waase si’ isu tagaysa. Afo haddi la yiri inay naag tahaa muuqata. Naag haddii la yiri inay naag tahayooy ninkii nusqaan ka tahay yaa muuqata. Islaan haddii la yiyi waa magacii naagtii oo sogol dahan. Dangalo naagta naagta lala qabo yaa waxay ku tiraahdaa dangaladaydii, yacni meehii naagta lagala rabay ayeey dangalo ka tahay meeshaasoo oo kale. Hariifana waa ayadii oo kale oo waa naagtii naagta lala qabay, ama waa dangaladii ama waa hariifadii waa hadal is dhex yaala isla markaas waxaad ka arki doontaa hadallada maahmaahda naagaha. Soomaali waxaa la yiraahdaa afar naagood hadday Hooddaar. Gaari meesha laga yiraahdo ama Hooddaar qolo u taqaanna, hadday ka soo baxdo afar naagood ayeey ku soo hartaa, xoogaa ciidanaantii waxna lagu nacaayo waxna aan lagu nacaynin: Madeeco ereley ah inay naagtii tahay, Madhasho masalla-fidis ah inay tahay, miskin taabac ah inay tahay, munaafaq reer-ku-aad ah inay tahay, afartaas naagood yaa hadday naagtii gaari ka baxdo yay soo gashaa, afartii yaa la qaybiyay oo middi la haysan karo iyo middan la haysan karin. Hadday madeecda tahay asay erelay tahay (Madeeco waa caynaasta naagta ahoo aan waxba tarin, doqon qolaa tiraah, qolana tiraahdo canyaas, dabcaleedidaas, sow ma aha); naagtaas madeecdo erayleyda ah hadday tahay oo ay eraleyna tahay madeecdana tahay furriin wax aan ahayn ma gasho, waa bixin. Saddexda kale haysashay lugta ku hayaan oo idinkaa garan doonna.

Madhasho masala-fidis ah caaqiba waxay leedahay hadday madhasho tahay asay masalla-fidis tahay, hadday kugu keli tahay yey ku awlaad tirinee waa la bixiyaa, laakiin haddayan kugu keli ahayn, awlaadaada naagaha kalaa laga dhalaa iyadana masalahaa lagu aadisadaa, waa baarri oo waa ma dhasho, oo dhal ma leh, laakiin waa masalla fidin oo gogosheedii ma laabna. Miskiin taabac ah, waa miskiin laakiin waa taabac oo dhib ma leh, hebel ma anaa u kasaayay ma anaa wax ba’aayay, waa gallaac aan liidata aad u liidata, xaarka gurigairridiisuu ilmaha ku duuganyahay, sacabadey ku gurataayoo oo ma doonto inay wax kale kugurto, waa la duugaahoo waa lala guraahoo gacnahaa loo mayraahoo garowgaasaa lagu wataa iyo ilmaha waa miskiin waana taabac. Waxaa soo haray: Munaafaq hadday tahayreer ku’aad tahay, saddex duunyo: geel lo’ iyo ari iyo beer wixii aad leedahay lagu wal mahayaa laakiin heshiis yeelan maysiin iyo isu timaadid; maalin walba qaylo ayaa idiin dhex taallaa, “najiskii reerka lahaa intuu aaday” mugaa ay tiraahdo oo xiisa ku jaraan aa in loo yimaadaa da’ lagu gefraa inta xiisuhu ka dhammaana waa laga dhuuntaa, waa munaafuq waase reer-ku-aad, lagama tago xiisahaasaa laga maalaahoo saasaa lagu waxeeyaa, tanina sidaaday tiraa.

Lisaanka ka leeto maahmaahda ah kitaabka Caribiga laga helana waxay yiraahdeen: lix naagood karraahiyo waaye, guurkooda karraahiyo waaye, xaaraan ma aha laakiin waa karaahiyo; Anaano, Mannaano, Xaddaaqo, Baraaqo, Shaddaaqo, Xanaano. Ninkaley ilmo u dhashay aasay “ilmahaygii ninkaygii hore ninkii saas ahaa” yeey leedahay Xanaanaa la

yiraahoo waa ololeysaahoo kuuma iimaan qabtoo wax la guursado, balo karaahiyaa i guursaday. Mannaano waa manno badan tahay, wallee waxaan qabtay, wallee waxaan keenay, wallee waxan yeelay, manaanaa la yiraahoo guurkeeda karaahiyo waayaa la yiraahdaa. Annaano hergeb hadduu ku dhaco ma adkaysan karto huu! Huu! Hii! Hii! Intaa i jaban! Waa ahaano “aar badaq” baa la yiraahdaa oo lama guursado. Shaddaaqo! Wax ka kuli adoon aragay is bedelaysaa “cub!”, oo hadda waa ay kuu fayoobeyd, laakiin in dhallax hadday joogto inay is gashaany leedahay, “war yaa ka caraysiiyay ... ... ?” Baraaqo: qoraxda hadday dhacdo gabalku hadduu soo baxo inta ka dhexayso “hoo! Hoo! Hoo!” qaylo, muggaasaad adigii baryeysaa “nacallaa kugu taal war naga aamus, naa deriska yuu kula yaabin”. Xaddaaqo: isha fadbadan tahay, shalay joogtaye il dafad wax alla wixii ay aragto waa sheegaysaa, “reer hebel aa waxaas haysta, dukaanka hebelaa waxaa yaal, war xoolaan meeshaas ku soo arkay”. Xadaaqaa la yiraahdaa il daf badan oo ishaasay ku dafaysaa wax la arkaba, iyadana guurkeedu karaahiyo waaye oo afratii horay lugta kula jirtaa.

Oo Soomaaliya maahmaahyadeeda iyo luqadaheeda ay ku maahmaaheen. Isla markaa ninkii ahaa Sheekh Axmedsh’ Abay Bakar oo xaadiqa ahaa “qas-qas carmaa” uu yiri “ iyo qaadis caana ah (khaadif waxaa la yiraahdaa caanaha hal nabar la lisay oo fadhiistay, qas-qas carma ah. Carmada bahalka kan la yiraahdo geedaha ka baxo oo baahida ku jirabto dadka oo dhanaanka leh haddii la kariyo) qas-qas carma ah iyo qaadis caana ah, midba dabuu la bato buu yiri, rafiiqa ruun ah garuun. Ratiga qaruud ah, ratiga sagaal jirka ah ama toban jirka ah ama kow iyo toban jirka ah ama laba iyo toban jirka ah ee xooggu u dhamaaday aa qarmuud la yiraahdaa. Rati qaruundah iyo qaalis juucla ah, midba makuu qalab saarahaynaa; geenyo qurxoon iyo khayr dameeraad ninba dhibkiisu la qaashanayaa: qaafadda naag ah qaafo; waa naagtii gaarida ahayd, iyo qoobka-jaarley maharka loo wada qaybihaayee”. Markaa wuxuu tilmaami rabaa naagow guursaday ow furay yaa gurigeed ow ka furay aqalkiiyoo meesha ku dhisan yaa lagu warsaday asagoo agta ka fadhiya, yaa la warsanayaa oo la leeyahay: “naagtii ka warran?”. Sacii oo awal loo xiray oo caanaha loogu xirayna meeshuu joogaa, aasow caana la’aan muggii hore ka sheegi rabaa, haddana ee dararay; asaguna wixii uu ahaa oo naagtii kala kulamay iyo haatan wuxuu joogo yuu sheegi rabaa: “Bahay bilcaan maanta la ii geliyay buulkaa” buu yiri “ragga bertay nabi Ciise maahino, buluftow forow la bacleelay maahine, baadidaa beryo kaa maqnayd oo bidhaanteeda ad u jeedday maahine, adoo u baahan hareed biyaahoo si fiican looga bogtooday maahiin, bushiaan xanuun baddankaaga haayoo Illahay kaaga badbaadshay maahine, biyo ku qaaday nin kaa baxaayo banaanka ley ku geeyo maahine, dalaaqadeedii haddaan dareeriyay iga degyay dedebka duudka saarnaa dukaday salaadii aan deyn jiray, dirac noqdhay anoo maanta daaciyay. Dareenya yaa sida maanta loo dabay, dambeedadiisa caanaha ku yaaloo midba ani mugoo waa i deeqaa”. Marka naagta fiican iyo naagta xun tilmaantaasay ku kala leedahay Soomali way kala yaqaaniin. Ragga gabyaaga ah nin waa kii yiri: “naag daba leh yaa laga baxshaa wuuqadii geele, waa maxay daleel wada qamadi iyo hadhiin!” Konton halaaduu ka baxshay dibilow geeyay asaa meel dataal ah uga dhaqaaqay. Naagta dabada lihi waa naagta dad fir fiican leh. Naag daba leh yaa laga baxshaa duruqadii geele, waa maxay daleel wada dhaqmi iyo gebigiisaba. Shallay weeye haddii mahaasi ay saas noqoto waa shallaay, haddii ay naagtu ay naagtu fiican tahayna waa mahad-naq. Saas yay u kala

tilmaan leeyihiin, marka naagtii hadday nug noqotay naag ba'ah, waxay ku maahmaahdaa Soomaalidu "beer aan goof lahayn", goofka waxaa la yiraahdaa meel inya la soo tacbaday xoolaha inay daaqaan ma ahee aan wax kale lahayn mugga sac meel aad ku ceshato malaha, beertu hadday cusub tahay, ri' meel aad ku dabrato ma leh, ratti la dhaaniyay meel aad ku dabrato ma leh, ileyn beertu waa cusubtahaye, waa galool meel ku yaalla dibnana xoolihii wax ka cuni maayaan, markaasay waxay yiraahdeen: "beer aan goof lahayn waa ilmo aan abooto lahayn, ama aan ayeeyo lahayn". Hadday abooto leeyihiin ilmuhu dadka abootada yiraahda habarta habarta dhashay ama habarta adooga dhashay ama ayeeyada aan lahayn, beer aan goof lahayni waa ilmo aan ayeeyo lahayn, maxaa yeelay naagtii nacfi kuuma leh haddii cunuggii qof u haaya aan la arag oo kiisaaya, waa waalid qoftani baalkay gelinaysaa canuggii, ayaduu ku hurdaayaa ayaduu yaqaannaa, ayadaa seexeenaysaa, ninkiina naagtiisa waa u naag, naag cunugii ka daba laadlaada oo ka daba ooynaayo, naag ninkii u noqon mayso, ninkiina naagtii waa u cusubtahay oo kama maarmo, markaasaa waxaa meeshii ka dhashay haddayan ilmahaasi ayeeyo lahayn naagtii waa nacfi beelaysaa, beertiina haddayn goof lahayn waa nacfi beelaysaa, maxaa yeelay rattigaas u dhaansan lahayd meel aad geysato lama arko, haa! Canuggii iyo adoogii yaa ku diriraya. Haddee waxaa suura gashaa, waa ninee, asagoo ayadii habarta oow dhegta hayo, haddii cunuggiiyoo midba dhan uga dhego yaa intaw lugta ka soo tuuro yaa ka suuragal ah; ayadana waa saasoo dhaqankooda ayeeyoda naagta oo hadday da' gaarto inta ka dambayda waa saas. Haddana waxwaxaa meeshaas yaalla wixii ay lahayd iyo wixii waalidnimo loo siiyay waa kay hayd, cuni mayso oo calooli uma marna oo isinka ilmahaa ku filan, wixii loo keenay waqtigii loo baahanyahay ay soo bixisaa, xil u soo bixisayaa iyo xanuun cidda keeda ay arago maanta oo cidda caawa ay liidato u soo bixisayaaba wax alla wixii ayeeyo ama abooto la ag dhigaahi waa kayd cidda u yaalla. Gabartii oo guriga timid oo walaalkii u timid oo booqasho u timid gurigii ayeeyada inay ku hoyato oo ay ku hergasho aa u dan ah adigana mugga gurigii kaagana jirto, walaashiina meel aad ku salaanto diiddo, walaalkaa oo yimid oo kula dhashay gurigiina kaagama jiro, walaalkiina booqashadiisa habartii agteeda yuu ku joogaa, wax alla iyo wixii yimidda oo xil ah hambadii siihaayna habartiiyaa haysa, fadhigii ay ilmahaas kula dhashay ay joogi lahaayeenna habartiiyaa haysa oo waa ayeeyo, ilmahiina ayadaa haysa oo odaygiina naag labaad oo aan nafaqo gooni ah kaa rabin, ... kaama rabto, wixii naagtii kaa celin lahaydna iyadiiaa kaa celinaysa, ayeeyada haddii ay gaarto oo Ilaahay kaaga yaalana saasay leedahay oo nacfigaasay leedahay. Kaydi waa ku nacfi, ilma haynta ku nacfi, wax garashada waa ku nacfi, wax la qabtaba nacfigaa weeye, oo Ilaahay u yeelay, marxabba, soo soro.

Dadkii deriska ahaa wuxuu yiri: "naagtaan maxaad ka furaysaa? wuxuu yiri; anigu naagtaan waan furayaa qaabkeeda uma bogin", "war maxaad ku furaysaa?" "Laba iyo toban ceebood baan ku arkay" buu yiyi, "laba iyo tobankaa ceebood saddex ratigaa ku qaba, saddexna arigaa ku qaba, saddexna deriska ku qaba, saddexna anigaa ku qaba. Saddex arigaa ku qaboo mug tatoonyo ay kadiida ka tamurayhii iyo mugtami maqaleed canuggii caano loo geeyoo la tuuroo calooshii ka jeexantahay iyo mooggii ajareed "meel uu ka dambeeyo ma ogi", saddexdaa arigaa ku qaboo kuma hayn karo, waa ceeb. Hongaankay u gaabiso iyo heeryadoo u yareeyso iyo haanta u weynayso saddexdaana rattigaa ku qabo luma haysan karo. Ilmahay ka disho

iyo haqabtooy u diiddo, wixii lagu dhaqan jiray yaa ardaha ugu dambeysana deriskaa ku qaba oo kuma haysan karo. Guriga sey ula hadasho hadal aan maqlayn oon ka jawaabi karayn hadal inuu yahay aan maqlaayo, gurmus igula muranto, gurtay wax iigu dhiibto, saa waa naagtaas caysane, guraal ay ii daymooto, saddedaas ceeb baan ku qabaa. Laba iyo tobankaas ceebood naagtaan kuma haysan karo, wax lagu hayn karo ma aha. Marka haddii saas ay tahay, ceebaheedii waa saas.

Waxaan maqlay oo aan qiso ku maqlay aasaa anigu joogis u ahayn, Sayidku waa kii dee xaruunta degganaa, xaruuntana waa taan dadka u furnayn dibadaha ah, waxaa la damcay oo la goostay in naagaha la haysto, illayn naag la'aan lama joogi karee, ceebtooda loo adkaysto. Ninkii yariaahda: "waan iska furahayaa naagta", waxaa la yiraah: "maxaad ku furaysaa?" nin wuxuu yiraa "cunaan ku furayaa", nin wuxuu yiraahaa "dhillaan ku furayaa oo naagta tan waa la ila leeyahay oo kuma hayn karo". Ninkii yiraan cunnaan ku furayaa, "waryaa hadday kuu roonaan weydo haddaad beenta inya kaga degto aad tiraahdo waan kula qaybsanayaa aday amay kuu diidi kartaa? War maya, hadda ku hay waa ceeb lagu hayn karaa. Dee ninkii diida oo ku hay diida xaruunta naag dambe oo gadaal lagaa siin maayo, haddaad ceebtaas ku hayn karto aad ku furto aa la yiraahdaa". Ninkii yiraaha "naagta tanaa tuhumaa iga galay oo waa layla leeyahay", "haye ma saasaa?" "Haa!" "War haddaad adiga ku dhegtoo tiraaho waan ku rabaa, amay kuu diidaysaa?" "Maya!" "Haddaad docdaada ka waxaysato dee haddeynaan kuu diidaynin waa ceeb lagu hayn karaa, hee naag meel walba lagama arko oo xaruun cidla ahaan joognaaye ee ha iska furin" ayaa la oran jiray, ninkii diidana waxaa la dhihi jiray "ceeb lagu haysan karo ayaad naagtii ku haysan weydayoo qof leeyahay ku siin maysaba". Saasaan qiso ku maqlay inay jirtay iyo in kale ma ogi, laakiin waa haddii ay jirto waa wax macquul ah, oo adduunka hadda ka hor ka dhacay. Marka hadday naagtii ciidan kuu tahay oo awlaaddaada siyaadadeedii tahay oo isinkaa sharaftiisa tahay oo iyada la'aanteed aadan guri laguugu magcaabaynin oo nin qooysba laguuga magcaabaynin, inaad adigu walaxaad ugu adkaysan karto ood xamili karto inaad adigu ka bursataa ee dqonimaday ka mid tahay oo "daantii mooge mara duug ah horteeduu leedaa" baa la yiri, dantaada haddaad moogaato maradaas duugga ah intaw cimrigeeda la eg yahay adigu cimrigaaga waw ka yaraanayaa, maxaa yeelay dantaadii baad moogaatay. Nin baa wuxuu yiri: "naagyahay anigu kolna kuuma adkaysan karo, laakiin waxaan kuugu adkaysan karaa kuu sheegahayaa, nimaanan ka maarmin aan adiga kaa maarmin, wiilka aan dhalay kama maarmo, adigana isagu kaama maarmo, marka haddii wiilkayga aan ka maarmin asawse adiga kaa maarmin, danta waxaa igu khasbaysaa in aan adiga kaa maarmin. Waa xigmad oo waxaa laga kasay naagtii la furay oo la soo qabtay waxay ku tiri wiilkeedii: "maandhow haddaan hilwaali joogo meesha la yiraahdo, asaad hawdhalo ku hayso ambaa uun hooyadaa ah amba hawadeedu waa isku dhow yihiin, haddaad hil-waalid joogo asaad hawdhalo ku hayso ambaa uun hooyadaa ah", waxaa laga gartay naagtan, markii ow xoogaabo oo xoolaha ow qabto oo inaan laga maarimin ow arko, haddayan nin uga dhasho ayan ku dheganeyn, wiilkii ay dhashay huri mayse ee, inuu inya doonto oo adoon jeclayn afka kaa soo fadhiisiyo oo yiraahdo habartayda haddaadan igu rabin haddee anigu iyadaan u xoojinayaa, oo dhibaatadaas bey leedahay. Markaas haddana waxay kugu noqohaysaa inaad asagii, haddaadan huri karin qofkiiyoo aadan huri karin, aad ku hansiddaa, waa meeshii lagaba yiri: "ama hoog oo hallow oo ina huryahaay,

ama hoog oo hallow iga huryo hubi". Naagtii ilmaha dhashy, "war nin yahay ama hoog oo halaawoo ina hubriyohaay oo ina huryo inaan hayo waa dhib ama hoogoo hallow oo ina huryo hur. Haddaad ina huryo hurtana hallawdayoo ilmahaasaa kaa hallaabahaya, haddaad haydana ina huryo ilmahaas aad ku haydo darteedna halowgii ay ku halleynaysay hurimaysid. Rag wax dhib leh saasow naag uga arkay, wax dheef lehma saasow uga arkay. Isku laayoo wixii la ogaaday inaan naag laga maarmi karin, lagama maarmaan inay noqotay, mar haddii lagama maarmaan ay noqotana dhibkeedii in loo adkaysto yay noqotay. Aniga ninbaa gigar helay, oo wiil baa iga gar helay, naftayda meeshaan joogo, hooyadiisaan furay, niman odayaalahoo saddex may afar ah yaa ii soo hergalay, sebenkii dharku xumaa weeye. Shiikh Daahirkaas oo aan muggaas dul buuxis ah oo hal gu' ah jooga yaa ii jooga, dharku waaguu xumaa weeye, afar qayd maro ah aan isugu tolahayaa, nabarkii orgi baan u qalay jeer jeer ah wiilkiina waxaruhuu la jiraa, waxarohow soo celiyaa, waxarruhu hadde waa badan yihiin tiro aan yareyn weeye, in dhelax hadduu joogayba wuxuu yiri : "Aabow maro isii", "war anigaa ku siinayo ee maro", odayaashii iyo neefkii waa waa qalan yahay naagtii baa bislaynaysa, aniguna maradii baan talahayaa oo waa meel baadiye ah, markaasuu wuxuu yiri: "war Aabbow.... !" aniguna socodaan u badanahay, haddaadan maro isiinaynin asaadan nala jiraynin adigu aan ku baal galayaa maxaad habartayda iiga furayday aan maradeeda la hugdee? Nimankii odayaasha ahaa waxay yireen: "ninkaas adoon berega maro siinin neefkaas aad noo qashay ilbihiisi eelo la furay weeye, maradii oo bar tolan yahay aa inyaan fur furay, illeyn beled ma dhowa ee oo qayd uga ggoyay aan shan siddeed oo kale isku tolay, aniguna waxaan lahaa maro uura leh hakuu ahaato, wiilkaagana aad maro ka siisid. Subaxaa wiilkaas iga gar helay oo maradii iga kala gooyay, intii ka dameyday naag ma furin oo ilma leh. "Haddaad naga tagayso oonaan maradii kula huwanaynin, haddaanan maro gooni ah aana ku seexdo isiihayn habartayda maxaad iiga furayday aan maradeeda la hugsadee?" Nimankii odayaasha ahaa waxay igu xukumeen inaan maro siiyo maahine inayan hilbihii cunin, ilbihii oo iga dhintay nimankii odayaasha ahaa maan ka tegi karaa? Maro kalena amaa la arkaa? Maradii iyaan furfuray barkiisii u gooyay yaa barkii kale naagta u tolay, isagaaba iga gar helay. Saa weeye oo wiil godobtii saasay noqotay. Waxow sabab u noqday wax kasta aan ku qabo ee inaanay muggaa ka dib naag wiil leh sanan furin, inay ii duqowdo oo madixiis ku joogto maa hee. Khaasan saasaa rag midka la yiraahdo yoow isku dhex yaavsanyahay oo isugu dhex jiraa. Bal marka rag badanaa u aftahanee oo u dihane, aniga ha i su'aaline rag kale su'aal qofkii adigu aad damacdo aniguna intaasaan uga baxayaaye.

A. Nuur/ Waxaa weeye horta Xaaji Maxamed Liibaanow waxaan kugu soo noqday laba goor, markii ugu horeeyay yaan warka aan kugu soo boodnayoo, xoogaa waad bootinaysay oo si fudud baad noo gashay, laakiin haddaad wixii naga maqnaay oo dhan waa ku sugtay, xoogaa waan ku maleenayey gaal. Haa! Markaa waxaan ku noqonayaa Cali Mudiir, Cali Mudiirow warkaan inoo bilaabay, Caliyoow aniga dib baan u dhiganayaa warkayga ee magaalada ka hadli maayo, Cali Mudiir.

C. Mudiir/ Waxay ila tahay inaan hambaba la ii reebin ee bal aan iska kuf kufo oo aan isku dayo oo aan ikhyaarta waxyaalo kale xasuusiyo. Horta kaalinta haweenku ay ku leeyihiin bulshooyinka bilowga ah, adduunku kalama fogeyn,

runtii naagtu markastaaba waxay ahyd mid raacsan oo ninka ku lifaaqan bey ahayd, xitaa diinaha nafsadoodu in raggu hogaamiye yihiin ayeey sheegayaan, haddii aan diinteyna ka soo qaadano waatan lagu leeyahay; “arrijaalu qaawamuuna calaan nisaai”. Oo ah in nimanku hoggaaminta ay leeyihiin oo ay naagaha ku leeyihiin, ‘Xadiis badan iyo Aaydao badan oo sidaas ahina way jiraan’ oo mar kastaaba naagta wanaagsani lagu qiimeeyo kolba ninkeeda siday baariyad ugu tahayoo oo raaliyad ugu tahay, aduunku weligiis kalama fogeynoo naagta markastaaba waxay ahayd dhan haddii laga fiiriyo badeeco kama fogeyn raggu leeyahay, qiimada aan ku sheegaynana kulligood wey lahaayeen, waana leeyihiin ilaa hadda. Su’aashu waxaa weeye naagtu markastaaba seey wax u raran jirtay, xoolaha yaa lahaan jiray? Wax ma dhiibi jirtay? Wax ma hibeyn jirtay? Wax ma lahaan jirtay? Say dhaxasha u heli jirtay? Xittaa mararka qaarkooda xoolaha kay yeelataa? Kay qawracdaa kay qashaa? Kay listaa? Hawshu way qaybsanaan jirtay. Meelaha qaarkoodna, dhinacaasna aad ayaa looga hadlaye aan u soo noqdo koonfurta; meelaha qaarkood xitaa haweenka xoolaha qaar aanay qalin ama maba qalaan taas waxaa faafaahin doonaa mar kaleeto haduu Alla yiraahdo, Sheekh Abow. Gobaladu wey kala duwan yihiin, dhaqankooduna waa kala duwan yahay, siday nooka bilaabay oo ah sida habka dhaqan dhaqaale aan ogsoon nahay ama u kala duwan yahay oo ah beeraaley, raacato iyo dadka xeebaha iyo badaha meelahaas deggan; marka saas ha ahaadeene ama ha noqoto ee arimo badan ayaa laga simanyahay oo ah mar kastaaba naagtu inay ninka ay ka kaalin yartahay, ka kaalin yartahay marka la leeyahay, inay tahay inay mar kastaaba qof ragga ku lifaaqan ay tahay oo mararka qaarkooda badeecado ayna ka duwanayn, inay naag baal ay la dardaarmaysay gabadheeda oo waxay tiri: “maandheey ninkaaga addoon u noqo ha kuu noqdo addoonee”. Macnaa waxaa weeye markaad addoon u noqoto, beerri u noqoto ood warba ka diidayn oo war ku soo celiso isagana sidoo kalee kuu noqonayaa. Marka borotokoolla ceenkaas ah ayaa jiray.

Wejiga Labaad

... . Xushmada qofka haweenka ah ee dhiddiggu uu ku leeyahay bulshada Soomaliyeed wax badaan baa laga soo hadlay, la soo falanqeeyay, haweenku ama dhidigowgu wuxuu leeyahay magacyo badan amba amaan ah ama liidid ah ama si uu u tilmaamayo haweenka, haddii saas wuxu u badan yihiin magacyadaas badan ama tilmaantaas badanna wuxuu tusiyaa, sida cilmigu sheegaato, qiimada waxaasu leeyihiin ayuu ku tusiyaa, kolba magacyadaas badan. Bilcaan, islaan, haween, afo, gabar, magacyo caynkaas ah ayaa jira, haddaba annagoo meehaas ka soconayna magaca la yiraahdo haweenka midka ugu qiimo badan, sidaan anigu u kasaayo, rabana in laga falanqeeyo waxaa weeye waa naag, haweenkuna naagtu wey ka cararaan, waayo, sababta maxay tahay? Nin marka la maanayo waxaa la yiraahdaa: “nin buu ku banaan yahay”, ayaduna waxay tiraahdaa: “ninkaas ninku kama helin war nin ma aha”, annaguna waxaan niraahnaa: “naagtaasu naag bay ka banaantahay, hebel naag wanaagsan buu qabaa”, “ma naag baa?” markii la weynaynaayo, ayaguna wey diidaan, cuqday ka qabaan, magacyadaas badan midka ugu weyn anigu waxaan qabaa inuu yahay “haween”.

Haddaan dhinac kale niraahno, haweenku bulshada Soomaaliyeed run ahaan, say wax u yihiin haddaan u sheegno, badeecaa kama duwanaan jirin, xoolaha la gato kama duwanaan jirin, dhaxalku wax kuma leh oo waxyaalo caynkaas ah baa jira. Raggii hawshaa lahaay u bilaabi bal Xaaji Fiqirburaalow arrintaas ka sii ambaqaad waad mahadsantihiin.

Fiqi/ Waa tahay. Horta mawduuca kan laga hadlaayo waa iga horreeyay, hase ahaatee haddii aan yarahee ka taataabto magacyada haweenku wey fara badan yihiin, guud ahaan marka la eego dadku wuxuu yiraahdaa badiba “haween”, hasaahaate marka haween guud ahaan la yiraahdo waxaa misna dadku yiraahdaa: “Gabar iyo Gambooley”, misna waxaa la yiraahdaa: “Guudadley, intii guudadleey ah” markaana waa jamac baa loo yaqaannaa oo waxaa weeye Guudadley ama Gabar ha ahaato ama Garoob ha ahaato ama mid kale oo la qababa ha ahaato ee waa la yiraahdaa. Markaas ammaanta waxaa mudan sidii hadda aad u sheegtay waa fara badan yihiin amaantu, wax magacood lagu amaanaa jira, hase ahaatee waxaa jira hadallo ama rag ha ahaato ama haween ha ahaatee usluubtu ka maqantahay ee aan leys oranin; bil matal, markaynu niraahno naago maxaa ugu xun la yiraahdo? Waxaa ugu xun baa la yiraahdaa marka ninka iyo haweenku ay wada hadlaan: “naa naagyahay guriga ama joog ama ka tag”, markaa halkaas waxaa laga qiyaasayaa in hadday joogtana wax ma tarto ay tahay, hadday maqantahayna waxba yan la tebin, “naa naagyahay guriga ama joog ama ka tag”. Waa koow.

Marka la ammaanayo ninkaas lama yiraahdo badiba caashaan oori baa la yiraahdaa haweenku oo gaari waa la yiraahdaa, basar waa la yiraahdaa, hase ahaatee guud ahaantii haddaynu u noqonno marka la amaanaayo iyada oo lagala xishoonaayo cashaan hadallada qaarkood asluub wanaagsan in lagu yiraahdo: “ninkaas bilcaan wanaagsan buu qabaa”, bilcaan wanaagsan waa hadal dhar saaran yahayoo xishood ku jiro yare, laakiin marka la yiraahdo, Soomaalidu waxay u badantahay inay tiraahdo; “ninkaasu naag wanaagsan buu qabaa, naag gaari ah yuu qabaa oo aad u wanaagsan oo qaymo badan”, waa kow. Marka waxaa la yiraahdaa naagta qaymaha badan waxaa lagu qiyaasaa sida shinnida oo kale oo waxaa la yiraahdaa: “waa sheel badan tahay, naagtaasi”, waa naag aad wax u sheesha oo had iyo goor gurigeedaasu waa nooc kale, waa la ammaanaa, misna kuwa kan aad sheegaysa ama dumaasha ah ama cashaan xishiishta kan lagu sheegayo waxaa la yiraahdaa waa laba oo raggana waxaa la yiraahdaa xigsiisan hala siiyo maxaayeelay Soomaalidu waa tan tiraahdo: “ifkaa laysku dumaalaa”, maxaa yeelay naagta nin aad isku dhowdihiin ama walaalkaa qabo ama ina adeerkaa qabay uu ka dhinto haddeyan fiicanayn ninna guursan maayo oo waxaa la yiraahdaa: “ifkaa la isku dumaalaa” waa koow. Ninka xigsiisanka la siinayo, labada magac baa kala jiroo waa Xigsiisan iyo Dumaal, ragga xigsiisan baa la siiyaa, laakiin ninka xigsiisanka la siinayaa waa nin loo bogay wax tarkiisa iyo qiimahiisa ee nin walba xigsiisanka la siin maayo. Naagahana mid waliba la dumaali maayee tii uun wanaagsan yaa la dumaalayaa oo waa tan la yiri caashaan “ikaa la isku dumaalaa”. Macnahaasu marka waxaa weeye magacyadu way fara badan yihiin hasa ahaatee marka la yiraahdo: “naa maxaad sheegteen?” waxay yiraahdaan: “naar naar ahaw oo naarta Alle ku geli, war ma adaa na naagaystay?” way ka xanaaqaan naaguhu. Laakiin marka la leeyahay: “ninkaasu naag fiican buu qabaa” waa nooc gooni ah iyaduna, laakiin marka la yiraahdo “naagahan”

waa hadal qaawan oo iyaguna ma oggola, dadkuna kama daayo, waxay oranayaan: “war ma adigaa i naagaystay?” ninkeedii waa ka ogolyihiin “haayaa heblaay!” Laakiin waxaa wanaagsan in had iyo goor magaca la raaciyo xitaa haddaad bal markaas “naa” leedahay markaad tiraahdo “naayaahee” iyo markaad tiraahdo “naayaa Faadumooy! Naayaa Dhuuboy!” labadaas magac magac asluusan iyo haddee magac qaawan bay kala yihiin.

Haddaba ammaanta haweenku waxaa weeye oo la yiraahdaa marka la amaanaayo “naagtaasu waa naag is raacsan xag dhaqaale xagga edebta, xagga wax maqalka, xagga nin u roonideeda, xagga tol ururinta, xagga xoolo dhaqidda, xagga guri samaynta, xagga farshaxanta, dhinacyadaa marka loo wada eego waa tan lagu ammaanaa oo naagiba naagtay caashaan ka gaarisan tahay dadkuna waa ka wada jecel yahay iyada, misna waxaa la yiraahdaa naag calaamooyin fara badan baa lagu dhawraa, waxaa la yiraahdaa naag baa ninkeeda u roonayn oo ninku uusan jeclayn oo uusan u roonayn, hase ahaatee u roon tolka, oo hadduu ninka yiraahdo “naagta waan furiye” oo bud loole soo baxsadeen “oo ma heblaad furaysaa?”, maxaa cashaan ururintii ay ururinaysay dadkaas tolka ah ama qariibka ay ururinaysay yaa lagu dhowraa. Naag baan tolkana u roonayn ninkaana u roonayn, laakiin u roon xagga dhaqaalaha oo had iyo goor dhista reerka, oo aan oggolayn inay wax bahayso, maxaa yeelay waxaa dhacay ragga marla rasasay waa ku jiroo waxaa la yiri laba nin, waa sika sheeko ee, naag baa iyado oo ninkeedii maqanyahay marti u soo hoyatay, markay martidii u soo hoyatay yay ri’ u qashay martidii, naagtu naag fiican oo la ammaanay ahayd, ninkuse macangeg buu ahaa lex jecla xun, markaasuu yimid oo yiri arigii yuu tiriyoo “naa ridii kuriyo meeday? Oo xagee bey qabatay?” Markaasay tiri: “Caliyow xalay baa martii noo hoyatayoo martidii baan u qalay”. Wuxuu yiri “sidii aad u gawracday yaan anna kuu gawracayaa”, nin baa soo ordayoo wuxuu yiri: “nin yahaw naagta ha iska dilin if iyo aakhiro midna dhiig kuguma wanaagsana, naas dheer gurigaaga gashay baa la siku habaaraa nin naag dilay waxba ka hari maayaan ee ridiina aan ku siiyo naagtana ha dilin”, markaasuu yiri: “Wallaahi in aanan yeelayn oo waan dilayaa maagtan”. Wuxuu yiri : “waxaad yeelaysaa arigayga dhex gal oo labo ka soo qabso u dhigma ridii kuriyo ahayd”. Markaasuu yiri: “Wallaahi inaan yeelaynin”, “saddex ka soo qabso” buu yiri, “yeeli maayo” buu yiri. Wuxuu yiri “intaa waxay dhaar iga tahay haddii aad naataa disho oo taladayda aad diiddo anna ninkii rag ugu soo horeeya ee yiraahda markuu arrintan maqlo “waryaa meeshan miyuusan rag joogin?” “Waa inaa aniguna inaan xabbad ku dhiftaa”. Ninkii naagtii buu dilay, markii saasu dhacday baa nin yimid meeshii cashaa dambe, arrintii dhacday buu u sheegay waxaa la yiri: “war meeshamiyuusan rag joogin?” isna waa kuu dhaartaye xabbad buu qaatay oo kii yuu ku dhuftay oo qam ka siiyay. Markaas dee ragba waa ku jiraa, ninkaan xumi oo caynkaas ah waa ku jiraa lala taliyay ee dhiigga lagala taliyay ee dhaqaalaha la siiyay oo ridiisi loo mag dhabay ee saddex looga dhigay ee taladii qaadan waayay ee ridiisii ku dilay naagtiisa caaqibada lahayd ee fiicnayd ku dilayba dee rag waa ku jiraa uun. Markaas dee anigoo mawduucii inaan ka baxay iyo inaan sidii u wado aan hadda kala garanayn, waa hadaladii iga horeeyayaa laga tixqaataaye aan weli xusuusnayn. Arrintaas oo tusaala ah yaan kaga baxayaa, wixii dambe aynu galayna oo magacyada ah waa ku noqon doonaa hadduu Alle Idmo, hase ahaate bal waxaan u dhiibayaa Axmed Nuur oo isagu hadalkan gacanta ka taagaya.

A. Nuur/ Koow. Horta sidaynu u sheegnay mawduucan horaa looga soo hadlay, wax badan baa lagu soo raftay oo odayaasha si fiican uga hadleen oo afeefta tan aad afeefatay meesha waa ku soo jirtaa waxyaabo badan oo laga soo hadlay oo haddee aniguna maanta aad noogu biirisay oo annagu baalmarnay ayaa jiray. Maanta waxaa la yiri bal magacyadii halagu noqdo, inkastoo aan anigu jeclaa dhowr waxyaabood in laga hadlo oo aynu si warka u soo koobno oo aynu u ekaano bal ma aragtay qof inuusan nooga yaacin koow. Waxaan jeclaa in Maahmaahyadan laga hadlo iyo magacyada loo yaqaan iyo maahmaahyadan loo yaqaan iyo suugaanta ay ku timid ku soo ururtay bal meelahaas inaan galno ayaan anigu jeclaan lahaa, inaty sheeko inagu geli lahayd oo warku inagu dheeraan lahaa.

Markaa sidaynu iyada u soo koobi karno bal marka u horaysa erayada laysla wada yaqaan oo caanka ah erayadaas macnahooda inaynu dhuuxno waa loo baahanyahay, bal dumarow maxaad tahay? Dumarku waa kow. Anigu waxaan oran lahaa bal erayada dumar la yiraahdo dhinacyada iyo meelaha qaarkood waaba lagu diriraaba, waa dumar. Haween iyana waan maqlanaa oo waan garanay, haddana waa tii uu Fiqi Buraale ka hadlayey. Naag iyana weynu ka hadlaynay, warku waa tii uu ku socdayo warkayna oo dhan naag buuba ku socday. Islaan weynu maqalnayoo ninku naagtiisa islaantay buu dhahaa. Xilo waa la dhahaayoo weynu maqalnaa. Afo waynu maqalnaayoo ninkan afadiisii waynu maqalnaa. Oori waynu maqalnaayoo hebel ooridiisii waynu maqalnaa. Habar weynu maqalnaayoo, dee hebel habartiisii weynu maqalnaa. Hooyo waynu maqalnaayoo caruurta ayeey hooyo u tahay, xattaa mararka qaarkood “war hooyo ma joogtaa?“ ayuu yiraahdaa, meeshii naag uu ka oran lahaa wuu kala xishoodaayoo markay weynaato oo da’ gaarto ayuu dhaha “dee hooyadii majoogtaa? Hooyadii reerka baa maqan“ hooyadii reerka baa la yiraahdaayoo eraygaas aad baa loo isticmaalaa, walow hooyada loo yaqaan magacmagac gaar ah oo ilmihii la dhalay ay dhahaan, marmar baaba loo oggolayn oo hooyadii reerka la oranayaa marka inay naagtaa naag qayma leh tahay oo ninku kala xishoonayo waa la yiraahdaa. Gabar waa la yiraahdaayoo hebel gabadhiisa baa la yiraahdaa, waqooyi hadda gabar baaba caan ka ah oo waxaaba lagu leeyahay waa gabr. Marka inagoo kulli dhinacyada jaanif kasta ka eegayna ayaa waxaan jeclaan lahaa inaan... ... , horta bal erayadaa goortaynu aad u kala qaadqaadano ee erayadaa aynu macnayno oo mid walba macnaha uu asalkiisa hore ahaa, sida uu yahay meesha uu ka yimid, intaynu baarbaarno oo aynu is weyweydiino, haddana misna Maahmaahyadii iyo gabayadii uu ka yimid aynu u noqono ayaan jeclaan lahaa, yacni si wixii suugaan u noqdaan oo baarbaarkaynu u tooso, marka yaan ku wareejiyaa?

C. Dh. Weyne/ Mahadsanid Axmed Nuurow. Waxaa weeye dumar magacyo haddii la yiraahdo dumar, haweenay, afo, inan, foodlay (waa gabar timo tidcan), gashaanti, waa tima tidcan tahay iyo gashaanti waa isku mid, waa foodley iyo waa gabaryarna waa leeyihiin. Marka afo iyo haweenay iyo naag waa dumarkaa dhaqmaatiga ah ee la qaba. Habar iyo islaanina waa markay dhalmo ka bax yihiin ee ay waaweynaadaan oo saasay u kala soocan yihiin. Horta magacyadoodii waa kaa. Maahmaahahooda raggii hore haweenku uma qabaan nabar kan aad dadka ku dhufatay inay ma aragtay ay is qabaan ninku nabar uu kugu dhuftay waa ku dilayaa waa qabaan, laakiin nabar aad ku dhufatay ayaa karaya wax yeelaya u ma qabaan. Meesha laga yiri “naago nimay legdeen kama kacaan” waa caynkaa, haddii Ilaahayba u ridoo u legdo

marka aad ka kacdid buu ku dilayaa bey leedahay weligeed ka kici mayso, oo waa ceenkaa. Nabarka ay ku dhifataane wuu u dhimanayaa isma laha, oo waxbaa gacantaadaa wax taraysa dilaysa isma ay laha, laakiin nabarka isagu kugu dhibta waa u dhimanaysa bay is leedahay; waa meeshii laga yiri; naagi nimay legdaan kama kacaan. mid kalana waa tii la yiriyoo laga maahmaahay waxaa la yiri “war meesha tan sow lagama dhinto lagama noolado ma naagaa ka talinaa? Illayn ammaantood inaynu Wadanaalee ma aha waa in gees walba laga mara. Waxaa la leeyahay yacni waa talo jilicsan yihiin, mid kale maahmaahaa jirtayoo, waa tan la lahaa “cilmi naagood ninkii diidaana caruur la’aan buu dhexlaa, cilmi culima ninkii diidaana cadaab buu dhexlaa”. Waa tan la yiri, taana waa ku leeyihiinoo markay arimaha qaar kuu soo jeediyaan waxaa jira arimo aan lala qabsan oo iyaga lagu daayaa: caruurta iyo reerka iyo waxaa hoose iyagaa taladooda haya, tan laga hadlayaa waa tolo guud oo waxaana weeye raggu “reerkaaga naag wanaagsan baa kaa dhergisaa” gilgishaa la yiri si kalaad uga dheregtaa ma jirto waa tan la yiri. Waxaana raggu kala yahay sida raggu kala yahay naaguhuna ka la yihiin, naagta deeqda badan ee aynu imminka amaanaynaa een leenahay waa marwo oo waa deeq badan tahay, rag badani oo wanaagsani bay guriga kala baxdaa deeqda ah oo waxaa guriga ka erya deeqdaas tahay, maxaa yeelay ninkii guriga hadduu waxba ku soo gaari waayo ama bakhayl yahoo gurigiisaba inuusan reerkeedii kaga cayaartoo ama dadba wax ka siiso oo kaga dulfaaqdoo aanu doonayn guriga waa kaga baxdaa. Isagiiyoo maqan oo maanta hoosayaan oo ku ogaaba inuu gurigii waxyaalo wixii uu u yiillay u dhigtay mid baa yimid oo kii bay siisaa, isagii baa wuxuu ku dhacaa qadoodi, wuu kula coloobaayoo naago badan baa gacan badnidaa iyo deeqdaasi guriga ka eridaa oo ninku kula colaabaa oo ku saaraa, naago badanina waa ku joogaan, naagtii tolku jecelyahay ninkana u daran tolkana u roonay ururisaana sida qaalibka ah waa ka tagtaa guriga, weligeed raggaasi iyo tolkaasi ha u soo gurmadeen ninkii baa qabee tolku ma qabo, ninkiina waa u darantahay tolkiina waa u roontahay, isago uun baa erya hadduu cawl Ilaahay mooyee isagii uun baa erya, oo ma wanaagsana, ninna waa nin Ilaahay hagaajiyay oo waxay yiraahdaan “ii hibeey, war waxaan reerkii ka hibeeyay” buu yiraahdaa, marka ajir iyo wixii arla waa ladeeyaa oo reerkiisu ma soo noqdo oo wax allaale biyaha haanta, haddii mid keligeed tahay xoolaha cunada, wax allaale waxay ka bixiso ajirkiisi wax buu ku leeyahay, awal bey waydiisayoo tiri, saasay u kala caqli badan yihiinoo, “waxa reerka aan ka bixiyo ma ii hibaysay?” oo waa say u kala caqli badanyihiin; qaarna wey iskaga dhex dhacaanoo waa kuwa wax ma dhigataa la yiraahdaayoo aanba ninka reerka waxbaba ku soo gaarin oo reerkana saas bay kaga tagaan. Horta ammaanta uun laguma wado ee xumaantoodana iyo ammaantooda waa isku guda jiraan oo waa caynkaa, labadana waa in la sheegaa. Taas gacanta badan waxaa wehlisa mid ninkeeda mooyaane tolkaba aqoon oo mar qura ka dib ka rogay, laakiin ninkeeda dhiisheeda iyo weelkeeda xeerada muqmada ugu jirto iyo ninkeeda aan mar qura sahayda ka go’ayn oo ninkeedu raggaba u ekayn, eryidina labada tan tolka u fiican ninkana u daran baa eryi u dhow, taa ninka u roon oo wax uun maquudinaysa ee u haysa ee ninkaas aan weligiis xumaanayn ee u haysa ninkaasi sida lagu furfuraa waa adagtahay, tolkana waa habaarayaa oo guriga Allaa kaa kiciyoo baa la yiraahdaayoo waa habaaraa oo waa necebyahay isagiina ileyn waa nin dantiisa ku wata isagii baana qaboo oo meher ugu xirah yahaye, lagama karo. Horta shuquladaa aan kaga war haynee aanu ku naqaan baadiyaha iyo

cilmigu ku dhex dhacnayoo horta sidaa weeye. Labadaa naagood waxaa u dhow tan deeqsiyada ah, taa ninka wax u haysa ee muquunisa isaga ma ahee cid kale aan aqoon lagamaba furfuri karo; horta iyana waa sidaa; waana wada garanaynaa caqli waxaan ku garanaynaa tan wax bixinaysa inay khariyad tahayoo naag caqli lahoo khariyad ah tahat yaynu garanaynaa. Waana tii ninku ka maahmaahay ee yiri "codkar nagood iyo caqli magaalo iyo ciroole buuray saddexduba waa ka soo dareen" nin baa yiri oo reer baadite ah; ciroole buureed ragga buurtu wax ka camal xunyahoo, waxaad arkaysaa isagoo amba wax daqray ama naagtii daqray ama waxeeyo ciradiisa laguma galoo ragga burta wax ka camal xun; caqli magaalana kii ugu da'weynaayoo sidii caruurtii uun baad oranaysaa war nin kani ma caruur baa oo muxuu waxan ugu kacayaa?" "shaqo kuma lihide buu ku leeyahay", waa nin reer baadiye ah ninka ku maahmaahay; codkar naagoodna qabiilo wax kuma yeesho col kuuma gasho reerkeeda iyo ninkeeda uun bay kula soo naqatayoo ninkeeda iyo reerkeedaasay ku baabi'isaa ee meel kale wax kagama tarto, sida looga maahmaahay waa sidaa, haddana haatan wax ka taataabtay la igana dadka hadalka liqaan ahay marka horana haya marka dambana ku hadlay haya, yaan u gudbiyaa.

A. Nuur/ Waad mahadsantahay Dhega weynow ee waxaan u gudbin doonaa Salaad, laakiin Salaadow waxaan jeclahay inaad, horta bal marka u horeeya gabdhaha aan arinteena kala qaadano, yuu hadalku ina dhex yaacine maxaa dhacay hadhow nimanka qoraaya wuu dhibi doonaa Koow. Magacyada aan ka hadalno markayno magacyada ka hadalno oo laba u kala qaadno gabadhii illaa ay ka guursanayso waa naqaannaa magacyadi loo yaqaan iyo marka la guursaday illaa intay god ka gelayso magacyada loo yaqaanaa oo naagta guriga joogta magacyada ay leedahay iyo waxa loo yaqaan iyo kuwa lagu caynayo iyo kuwa lagu sharfaayo iyo kuwa caynkaas ah oo saa aynu u kala qaadno, markaasna maahmaahaha aan galno, marka waan kuu soo qabanayaaye anigaa halkan xoogaa ku dhig dhigaye ee waxaan aqooninna hallay xasuusiyo iyo waxaan ka boodo halay xasuusiyo. Matalan (maya anigu fakarkaan diidanahay maxaa jira waan ka qaadanayaa anigu waxaan diidnahay inay ayagu qaataan waan u qabanayaa) gabr maxay ahayd? Gabar intay bay le egtahay? Dhoocil maxay tahay? Waxaasaan oran doonaa, anigu ma ogtahay mise waan ka baxaa?

Salaad Axmad Nuurow mahadsanid, aniga horta sidaydaba waa la iga hadal badan yahay marka anigu hadalkii waxaan u kasay su'aal, haweenkuna magacyo badan bay leeyihiin, marka ayadoo saas ah yaa haddana waxaa jira Soomaalidu rijimo badan bay kala degtaa, marka qolaba ay af gaar ah sii leedahay, waxaa jira dad baa gashaantii yiraahdaa; aniga kolba rajukaan ka imid gabdhaha gashaantii lagama yiraahdoo, inan waa la yiraahdaa, dumar waa la yiraahdaa, islaan waa la yiraahdaa, habar waa la yiraahdaa, hooyo waa la yiraahdaa, intii aad na su'aashay; marka intaas oo adigu aad na su'aashay intaba waa jiraan oo runtaa weeye habar waa jidhaa, oo habar waxaa weeye dadka ay dhashana habr uun weeye, hadday mae dhaqmaad ka bax noqotana waa habar oo taas waa habartii.

Dumar markii kulli kor laga soo qaado oo haweenba ay yihiin ama naag labadaasi waa isla mid, waa dumarku dhan, anigu markii rijinkaan aan ku dhashay aan idinkala waramayaaye, kulli waxaan niraahnaa ama naag ama dumar; haddii aan niraahno kor baan laga soo koobay, haddii la yiraahdo

naagna kor baa laga soo koobay. Marka naag iyo dumar markaas bay sii kala baxaayaan: inan baa la yiraahdaa, middii la qabo islaan baa la yiraahdaa, habar waa la yiraahdaa, waa middaas weyn oon carrabka mariyay hadda idiin soo sheegay, dumar waa la yiraahdaayoo iyagana waa kaas oo dumarku waa isla socdaan, gashaanti qolaa tiraahda, oo Soomaalida qaar baa gashaanti gabadha timaha tidcan u taqaanna, annaguna gabadha inanta ah ee timaha tidcan baan niraahnaa, foodley waa la yiraahdaayoo waa marka ay inanta gaarin oo ayaduna ay ka yadhtahay oo foodley waa niraahnaa, garoomey dadbaa yiraahda anagu ma niraahno dee anigu meeshii aan ku dhashay baan idinkala hadlayaaye. Marka xushmadooda midba si waaye, gabadha inanta ah aad Soomaalidu u qadirisaa, marka qadarintii iyo anigu waxaan islahaaba maalintii horay dhamaadeen, naaguhu hunguriga ay dhigaan iyo annigu ku noqon maayo, maxaa yeelay horay baa looga soo hadlay oo waa dhamaatay qadarintii naaguhuu lahaayeen waa soo dhamaatay, warka anigu waxaan moodayey waxaa laga hadlayaa inay yihiin shaygaas maxaa la yiraahdaa? Muxuu yahay? Haween maxaa la yiraahdaa? Maxaa gabar la yiraahdaa? Sidii aan markii hore hadalka noogu soo qaadeen, anigu kaasaan mooday in lays haybinayo maahee anigu moodi maynin in naagtu saasay ku fiicantahay iyo saasaa la yiraahdaa, iyo anigu hadalkaas inuu soo dhamaadayaan moodayey oo aan aadi mahayo. Marka anagu naagihii midi waa habar oo waa islaanta dhalmo dayska ah oo dhalmo daysay, mid waa hooyo, dadkii waxay hooyo u tahay ama ha dhalma dayso, ama wixii ay dhashay ayay hooyo u tahayoo hooyoo taasaa la yiraahdaa, ee hooyo kulli oo dhan naagaha annagu caradayda lagama yiraahdo, hooyo wixii ay dhashay bay markaa u tahay, midi waa ayeeyo oo wixii ay dhashay bay sii dhashay oo ayeeyo baa la yiraahdaa, oo markii ay muxuu ahaa ilmihii gabadheedu ay sii dhasho ama midkii uu wiilkeedu sii dhalo ayey ayeeyo u tahay oo ayeeyo buu yiraahdaa.

Magacyadii baan kala qaadqaadayaaye; midi waa aayo, ama abtigaa qaba ama adeerkaa baa qaba, ama aabahaa baa qaba, saddexdaasna aayo baan niraahnaa, oo waa anigu haddee waxaan ka warramayaa Mudug oo ah meesha aan ku dhashay, midi waa la arkayoo gashaanti bay yiraahdaanoo meesha gabadhii inanta ahayd aan inan annagu ka niraahno iyagu gashaanti bay yiraahdaan, oo waxaa matalan intii ceelkaa Wardheer iyo meelahaa baan ku arkay, midna waxay yiraahdaan ayadiiyoo inan ah baa waxay yiraahdaan foodley oo halkanaan ku arkay, intii Kismaayo iyo meeshanaan ku arkay oo foodley bay yiraahdaanoo oo weli lama guursan. Naag oo dhanna waa jeneraalita, marka ama ha ahaato anigu horta intaasaan ka aqaan su’aashaad na su’aashay, waad mahadsantahay.

Fiqi/ Bal imminka aynu innagu dambeyno ee aynu Xaaji Maxamad Liimaab u dhiibno isagoo mawduucii halkiisa ka amba qaadaya.

X. M. Liibaan/ Fiqiburaalow waad mahadsan tahay dhiibistaas aad tiri. “Bismilaahi Raxmaani Raxiim”. Waxay ila tahay Soomaaliduna waxay tiraahdaa; “malab malab lagu daray moogina waa siyaadiyay macaanina waa u sidiisii” oo macaantii kama bi’in. Haatan meesha wixii la sheegaa waa xigma xigma lagu daray maahine xigma xigma nusqaamida ma ay ahe, waxaanan lagu yaabin hadalku hadduu bato macaanida uu leeyahayaa sida u badan, maxaa yeelay qofku hadday macaani badan macaamilka meel ku leedahayoo taradkada meel ugu leedahay oo megaca meel ugu leedahay oo nasiibka meel ku leedahay sidaas ay magaceeda iyo dakhligeeda bani’aadamka ku leedahay

qofka dumarka ahi sida uu u badan yahay yaa hadalkeedu uu u badan yahayoo saasaan badide looga yaabin, umaduna, “ood qaadis iyo jiidis waa isla guri geyn”, yaa dadku ku maahmaahaa, qofba si ha u taaqaano ee waa wax qofkii meesha la tilmaamahayay tilmaami bixiskeedi waa wax wada soor arooryo qofkii. Gabar waxaa la yiri; “ Rag garaadkiis wuxuu ka bilowdaa ger, gabowgiisuna waa ciro, intii ger ka horeysaa garaad laguma tilmaamo oo waa tan la yiraahdo; “ labaatan jir intuu geed ka boodo ayuu talana ka boodaa”, saasaa kuu caddaynaysaa in ger hortii aan garab lagu tilmaamin. Naagna waxaa la yiraahdaa “ garaadkoodu gabar ahaantooduu ka bilowdaa, gabowguna waa gambo”. Haddii gambo loo saaro kaddib naag gabow uma dhinna, maxaa yeelay hadday cirro yeelato waa ka baxday darajadii naageed waa ka baxday, intaasay gambada leedahay oo timaheedu madow yihiin yaa garaad lagu xilhayaa, waxaana garaadkii ka bilowday waa gabar ahaanta.

Gabar iyo naag ama oori wax kastaba ha la yiraahdo ee iyo habar saddexsaana martaba yay soo mari kartaa, foodley mugga ay tahay oo cunuggu uu yar yahay foodda tan waa tilmaan nammana ay timo u tidcaan gabdhihii, gabarna ay tuur ayadoo aw ku yaala yay fooddii yeelaan, fooddaasi bilowna waa iska lahaayeen oo fooddii waa loo yeelayaa, laakiin muggii gabar ahaan u wehlido oo yar yar ahaantii saddex jir iyo afar jir iyo lix jir iyo shan jir, iyo lix jir, iyo toban jir iyo hadday ka soo baxdo tilmaan bay u leeyihiin dadka foodda u yeesha, meeshaas waxay uga dhigayaan dad dambe ha waalis oo xiiran oo tima ku yaalliin haddii ay sii xoogawdo mid labaadaa lagu darayaa, hadday sii waynaato oo gabar xoog leh ay noqoto saddex alif markay dushaas ay ku yeelato dadka foodda la baxa uma dhinna gabartaa, waxay ku kala soocaayaan oo tilmaantaas dambe oo alifka iyo labada iyo saddexda looga kala soocayaa inay qofku fooddu ay xilkas sii tahay iyo inay fooddu xilkas la’aantii tahay, hadday fooddaas isaga taal ay tahay lama qoyo lama bisiliyo lama shanleeysiiyo si kastaba looma subko lama tartiibiyo, laakiin midda tani waa tima la tartiibinayaahoo tartiibtii madaxeedu wwuka muuqanayaa, qofku inay xilkasnimo ka muuqato waa gabartii. Gambooleyna haddii guri ay gasho intii ka sokeyda gambay qaadanaysaahoo dastuurka dadka tiisa iyo sharciga dhowristiisa intaba qofku hadday guri gasho intii ka dambeyda madaxeedaas inuu banaanaado uma ogala. Nin baa wuxuu “guur wuxuu ahaa xishood iyo dhaqmaad hilibna wuxuu ahaa oday iyo habar, geelna wuxuu ahaa dulliyo dambe” dusha neef laga rarto dambeedkana laga maalo yaa seminkii hore la qabi jiray, nin la arkow hashu afar jir hadday kuu gaarto rarid bar, dambeedkii waa laga falayoo sixir baa ku dhacay, afar cunug hal kuugu aada, afarna af saarayso la arki maayo ee afarta aad saartidee rar baro hasha oo dambeedkii geekiis ahaa waa tageyee dushii yaa haysay, hilib wuxuu ahaa oday iyo habar yaa habarteey ka dhalatay iyo yaa naagteeydu ka dhalatay iyo saasay hilibkaas habareed yuu ahaa iyo oday ina adeerkii, ina adeerkii hilibkiisu waa baaba’ay oo lama texgeliyo, hilibka habareed yaa habarteey dhashay yay ka dhalatay iyo naagteydu ka dhalatay sad dambayse nin walbow hilibka habareed ku dhawaaw, guurna wuxuu ahaa xishood iyo dhaqmaad, dhaqmaad inay qofku leedahay iyo inay xishooto labadaa baa la qabi jiray semenkii hore. Marka haatanna xishoodkii waa ka tegay sababta oo ah semenkii hore waxaa la qabi jiray afar nin oo sheekaysanaysa oo odayaal ah yaa tub ku socda raad ka leexday oo ka hor imman lahaa asay qofkiisii aragay arkeen: “waryaada maxay tahay dhaqaaqayadatan meesha ku leexatay?” waa la daymoodaa ileyn qofkii kama dheeraanine, geed bey ku aadantahay, haddii la dayey waa qof dumar ah madaxeedii gambada

labadaas dhafoor timaha ka banaanaadane inay suuf ku wadatay u qabtaa, waa cadyihiin, xishooday geedka iskula aadisay, ninka hadalka yiri wuxuu yiri; “nin la arkow xishood lama arko, gabadha timaha soohanaysa yaa tubta afar nin oo ku socota inay uga leexdaan maahine ayadu aan ka leexanaynin, naagta xishood ka waynay ha is orane haddaad dhaqmaad ka helaydo, xishood naageed waa dhamaaday ee dhaqmaad yay idin dhaafin”. Saasuu u hayoo dumarku xishood iyo dhaqmaaduu ahaa. Waxaad maqli jiraty wixii aad aragtaa ka weynaaday mugga, waxaad maqli jirtay xishood iyo dhaqmaad, marka kan haddaad goobto xishoodkii arki maydid, dhaqmaadna ilma dhalaayaad qasaysaa.

Mugga meeshaas waxaa kula babcan oo kula aaddan ilmaha dhalaaya yay ku dhaafin xishood arki mayside, maxaa yeelay waxa adigu ishaadu qaban wayday meeshii ili wax ka garataa, ilbuuxsi dhowr yaa laguu maahmaahay, xishoodkii adigu aad weyday iyadoo soo goobtay gurugaaga naag xishoota arki maysid, ha u muuqan wixii horood maqli jirtay xishoodkii la arki jiray naaga ka goob, hays oran, dhalmaantaas ilmaha yaacaya yaan lagaa badsan, xishoodna ha uga bukanin wakhtigiisi yaa laga baxaye: Xishoodkii naageed, haddii gabar laga soo baxayoo la guursaday xishoodkii iyo dhaqmaaddii yaa la dhex galay, hadday isu kaa qabtaan; nin baa wuxuu gabas soo gelishay

Dhaameel waxaa laga baxshaa dhuuba loo bogaye
Dhaayaha u roon gabar ah yaa bilan la dhaafshaaye
Goortii dhaqaal lagu arko yaa dhidal la geeyaaye,
Wiilkeeda oo dhaaniya yaa duco la dhiibaaye,
Waxase dheeha loo daba dhigaa taa ninkii dhalaye,
Dhaqankaa raggii wadan jiray ee dhimi iyo noolowge,
Wax la dhaha dhasiinyara hadday miri ku dawrayso,
Asuu dhaban gendaadleyska nacay toban ka dhiibaaya.

Naagta marada ay gundantahay aan u ulaysan karin oon aqoonin sida loo ulaysto, ulahay ilayn ku qurxoon lahaye dhabangandaad yaa dhaban gendaab la yiraahdaa,

Asuu dhaban gendaad la iska nacay toban ka dhiibaayo
Waxba yuu dhafoorada la qaban dhacal la diidayn
Waxba yuusan dhulka iyo faalistadiisa xararta dheerayn.

Waa kan ninka digada ku taagantahay saa dhulka u ..... .

Waxba yuusan leylkoo dhexe tegay dhuxola noolayn

Ninkii fiira ku tegay waa dabkii cawada la shiday oosa shida arrortii, waxba yuusan dhiilaha cugiyo dhihin wax af yare. Tolow inuu midda dhigo asaaw calaf ku dhowraayo, iyo inuu dhalmada eex siya yaa wax iga dhaama. Mugga arki maayo ee waa dhalma iixsi waxaa la joogaa nin la arkow dhalmada yay ku dhaafin, haatan ragga ku dambaysaa, maxaa yeelay waxba wixii jooga yaa laga ictibaar qaataa, ka soo bax. Waxaa meeshii jooga hadday xuntahay aya hadday fiican tahay, hadday gaari tahay iyo hadday gaari aan ahayn ee meel ku gaar tahay, hadday goombaar la nacay tahay, mar hadday wax dhalayso intii ka dibkayda ooy faricii badayso maba xuma, jiifiyo caanaa la yiraahdaa,

waxay kuu dhaantaa afarta qiblo naag magaceedu ka soo gelahayo yaa afarta qiblo oo ... ... sii jeeda oo ammaanteedu kaa soo galayso, wax ay guriga ku leedahayna aan la arkin oo adiga iyo ayadu keligiina aad isla tihiin, waxaa kuu dhaanta afarta qibla iyo afarta qiblo soor naag caydeeda iyo iimaan darradeedu ka soo galayso asii awlaad kuu leh taasaa kuu dhaanta. Soorta looga baantay magacaan tirada badan; afo la yeen, oori la yeen, haweenay la yeen, islaan la yeen, gaari la yeen, goombaar la yeen, xilkaas la yeen, wax arkaba magac loo bixi wuxuu isugu imaanayaahe waa uun qofka kan dumarka ah, intaas la sheegaayo wiil iyo wiil dhexaad iyo nin ger leh iyo sida aan naago wax u lahayn yaan ragguna magacaas naagaha xagooda xiga awsan waxba uga yeelan karin, lagamana maarmaan waaye oo qolaba si ay ha u taqaanee waa in dumarkii magac lagu tilmaahsadaa.

Waxaa dhintay laba nin, naagina waa dhimatay, naagtuna waa naagahaas la tilmaamayo oo fiican naag ah, wuxuu damcay inuu naagtii labadii nimood dhimatay ka weeyneeyaa kolkaasuu wuxuu yiri: “war nimanyahay dareema dhacayoo meeshatan xalay waxaa ku dhintaa la yiri laba nin iyo naag lagu ba’ay oo lagu ba’ay, sidaw labada nin naagtii uga daba geeyo ee u dhaafsiiyo, ilayn waa naag qayma leh, laba nin oo iska uun dad ah yaa dhimatay, mamugaasuu yiri: “meesha tan dareen baa dhacay, xalay waxaan maqlay laba nin iyo naag lagu ba’ay lagu ba’ay yaa dhintay”; naqnaqaas lagu ba’ayda ahi waa reer baaba’ay oo meesheedii qof kale oo la geliyo aan la arkin. Waxba yaan lagu sii dheeraanin naagaha annagu saas waa loogu nacfiyaa oo saas bey tilmaantoodu tahay, waxaase loogu baantay gebiga ay yihiin waxaas yaacaya Caasi ha noo noqdeen ama caabidba hanoo noqdeene beertii laga abuuraayey ooay ka dhalahaysay hadday noonoolyihiin intay ka dib kayda waa inaan sidii Ilaahay inoo siiyay uga mahad haynaa, wixii ka dhimmanna haddee niswa waxaa loogu magcaabay inay niswa tahay oo nin barkii tahay niswa loogu magcaabay. Si kasta haddii loo qaaleeyo oo loo qaaleeyo nin ka daba tegimayso intaay leedahayna ku ceen gab noqon mayso, haddii hagaaggii aan hagaagnay tilmaantiisu ay noo dhaamaatay, dersigii kaleeto aan haddana dhex geli lahayn aan isla garanno, hadday wax ka dhimanyihiinna waa hee caqligii “maan rag waa mudacyo afkood” aa la yiri, mudacyo afkood waa si kasta haddaad yeesho oo isugu dhaweydo labada af oo mudaca ah isma taabsiin kartid, sidaas weeye oo maanku meel keliya kuma wada jiro, waxaa dhiman ninkii is leh haddaba magroofankii waa u banaan yahay, haddii uu noo dhamaadayna sidii aan yeeli lahayn oo kaleete, Asalaamu calaykum wa-Raxmatulaahi.

Fiqi/ Waa tahay ee waxaa la yiri: “hadal iyo haweenka duco la’aan bay tarmaan”, oo ay bataan. Bal Aw-Daahirna u gudbino.

Aw-Daahir/ Mahadsanid Fiqiburaalow. Saakay aniga xoogaa waan fahma xumahaye, xalayaan yara xanuunsaday. Anigu tan iminka soconaysana waxaad mooddaa in haweenkii meel walba laga taataabtayoo aanay dib u noqosho aanay lahayn, haweenka halkaa dabadeed marbaa laga soo qaaday markii ay dhalatay iyo markii ay waayeeshay marba magacii loo yiqiinay waa la dhameeyay, mid uun baan ku kordhin lahaayoo ayeeyada tiisii dhashay macooyin yeynu niraahnaa halkaasi waa mid meesha ku jiraa, waa yahay. Haddaba marka haweenka aynu sidaa u kala sheegsheegnay, marka ninkoodu tilmaamayo iyagana markay ninkooda tilmaamayaan aan waxoogaa ka taabano. Marka la guursado haweenku waxay yiraahdaan; waa ninkaygii

bay xoogaa ku adkaataa oo badi ma yiraahdaan; “waa ninkii caruurta u aabe ahaa”, qaar baa yiraahdaa, “waa ninkii shaashka ii saaray”, qaar baa yiraahda, “waa caruurta aabaheed”, qaar baa yiraahdaa qaar baa yiraahdaa “Abbaan-warrahaygii” oo marka aad gaadho Boorame iyo wax alaale iyo wixii galbeed ka xiga hooyooyinku ninkoodu waxay yiraahdaan “Abbaan-warre” kelmaddaasuna waa kelmad aynu doonayno inaynu iyaduna aan ogaanno xoog bay leedahaye. Horta sidaasay magacyahaasuna ay yihiin oo ay iyaguna kelmaddaas shixmadda leh ma aragtay ay kana yara warwareegayaan oo ka xishoonayaan “waa ninkaygii” oo halkaa raggu kaga dhiiran yahay “waa haweenaydaydii iyo waa afadaydii iyo waa xaaskaygii” iyagu waa yara warwareegayaanoo kelmad xoogaa ka sii shixmad leh ka sii yar durugsan ayey raadshaan, waxaa xoogaa aad mooddaa inay ... ...

DHAMAAD!